# REPUBLIC OF SOMALILAND

## The President

REF:JSL/M/DEC/222-007/199

Date: 6 January 1999
Hargeisa

# DECREETO MADAXWEYNE NO: 07/99

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**MARKUU ARKAY:** Ansixinta Golaha Wakiilada Qaranka ee Xeer lambar 05/98 oo ah Xeerka Hay'ada Hantidhawrka Guud ee Qaranka.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda ku lambarsan GG/JSL/G-05/K-6/98 kuna taariikhaysan 13/12/98 ee Golaha Guurtida Qaranka ku ansixiyey xeerka hay'ada Hantidhawrka.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 82aad ee Dastuurka Qaranka.

**Wuxuu**

Soo saaray Decreetadan lagu baahinayo dhaqan galka xeerka lambar 05/98, xeerka hay'adda Hanti-Dhawrka Guud ee Qaranka.

**Allaa Mahad Leh**

**Maxamed Ibraahim Cigaal**
**Madaxeryne**

GW/X/3/43/98 15.12.98ka

Ku: Wasiirka Xidhiidhka Golayaasha JSL = Hargeysa=
Og: Xoghayaha Golaha Wasiiradda JSL = Hargeysa=
Og: Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda JSL = Hargeysa=

**Uj: Soo Gudbin Xeer la anxixiyey iyo Go'aanno Goleyaal.**

**Mudane Wasiir,**

Waxaan halkan kuugu soo gudbinayaa nuqullo ka mid ah Xeerka Hay'adda Hantidhawrka Guud ee Qaranka ( Xeer Lr. 05), iyo go'aanka Golaha Wakiiladdu ku ansixiyeay Xeerkaas ee Gw/kf-6/75/98, 05/12/98, iyo go'aanka Golaha Guurtidu ku oggolaaday xeerkan markii uu dib u eegis ku sameeyey e egg/jsl/g-05/k-6/98 ee 13/12/98ka.

Haddaba, waxaan idinka codsanaynaa in xeerka Golayaashu ansixiyeen waajibaadkiina ka gudataan si Dastuurka waafaqsan.

\- **HAWL-WANAGSAN-**

**(Maxamed Xuseen Cismaan)**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada.**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND
## GOLAHA WAKIILADA.

XEER/NO.05/98. Har. 15/12/98.

**GOLAHA WAKIILADA JSL.**

MARKUU ARKAY = Qodobada 145,(4) 146 iyo 147 ee Dastuurka Qaranka JSL.

MARKUU ARKAY = Qodobadda 60aad , 78aad iyo 80aad ee Dastuurka Qaranka JSL.

MARKUU KA DOODAY = Qodobadda mashruuc sharciga ah iyo soo jeedinta Guddiga dhaqaalaha ee la xidhiidha sharcigan.

MARKUU HABEEYEY = Si waafaqsan Dastuurka, shuruucda Maaliyada iyo Xeerarka kale ee Dalka JSL.

**WUXUU ANSIXIYEY XEERKAN**

**QOD: 1$^{AAD}$.**

**HAY'ADDA H/DHAWRKA GUUD.**

**Hay'adda Hantidhawrka Guud waa:-**

a) Hay'ad Dawladeed oo gaar ah sida ku cad qodobka 145aad ee DastuurkaQaranka.
b) Hay'adda u saraysa eel eh awood Hantidhawrnimo Dalka JSL
c) U madax bannaan yahay gudashada waajibaadkiisa iyo hawlaha uu u xilsaaran yahay, sida ku cad qodobka **145$^{aad}$** ee Dastuurka Qaranka JSL.

**QOD:2$^{AAD}$**

**QAAB-DHISMEEDKA H/DHAWRKA GUUD.**

Hantidhawrka Guud waxa uu ka kooban yahay, Hantidhawraha Guud iyo Saddex ku xigeennada Hantidhawraha Guud ah.

**QOD:3$^{AAD}$**

**HANTIDHAWAHA GUUD.**

**Hantidhawraha Guud.**

a) Waxa magacaabaya Madaxweynaha JSL, waxaana Ansixinaya Golaha Wakiiladda JSL, sida ku qeexan Qodobka 146aad ee Dastuurka Qaranka JSL.
b) Waa masuulka u sareeya hay'adda Hantidhawrka Guud, wuxuuna awood buuxda u leeyahay gudashada xilkiisa si sharciga waafaqsan.

## QOD 4AAD.
## KU-XIGEENADDA HANTIDHAWRKA GUUD.

a) Kuxigeennada Hantidhawrka Guud wax Magacaabaya Madaxweynaha JSL. Magacaabidaas oo waafaqsan Xeerarka iyo Sharciyadda Shaqaalaha Dawladda.
b) Ku-Xigeenadda Hantidhawraha Guud, waxay fulinayaan hawlaha Hantidhawraha Guud u wakiisho.
c) Marka Hantidhawraha Guud uu shaqadda ka maqan yahay ama ay ku timaaddo xaalad uu xilka u gudan kari waayo waxa fulinaya xilka Hantidhawraha Guud ku-xigeenka ugu derejada sareeya.

## QOD. 5AAD.
## AGAASIMAYAASHA WAXAHA.

Agaasimayaasha waaxaha waxaa magacaabaya Hantidhawraha Guud markuu kala tashado ku-geennadiisa.

## QOD.6AAD
## SHAQAALAHA HAY'ADDA H/DHAWRKA .

a) Shaqaalaynta iyo shaqaalaha Hay'adda Hantidhawrka Guud waxay waafaqsanaanayaan sharciyada iyo xeerka shaqaalaha dawladda.
b) Hay'adda Hantidhawrka Guud wuxuu ka soo erigsan karaa Hay'addaha Dawladda ama Ciidamadda Boliiska hawl-wadeeno ka qayb qaata hawlaha hay'adda Hantidhawrka Guud, oo aqoon u leh shuruucda maaliyada ama iyo Xeerarka garsoorka .

## QOD. 7AAD
## BAADHISTA XISAABAAKA & HANTIDA.

Hantidhawraha Guud & Shaqaalaha Hantidhawraha Guud, waxay awood u leeyihiin baadhitaanka maamulka Xisaabaadka iyo Hantida meelaha kala ah:-

a) Hay'adda Dastuuriga ah si waafaqsan Xeerarka iyo sharciyada loo dejiyey maamulka lacagta iyo Xisaabaadka Hay'adda.
b) Hay'addaha Dawladda dhexe, Dawladaha hoose, Wakaaladaha iyo Shirkadaha dawladdu leedahay, iyo Shariikadaha Dawladdu hantidooda qayb ku leedahay.

## QOD. 8AAD
## KHADKA DOOGADDA AH.

a) Khadka doogada ah wuxuu u reeban yahay Hay'adda Hantidhawrka, saraakiisha Xisaabaadka ka masuulka ah sinaba uma isticmaali karaan qalinka khadka doogada ah leh, khadka doogada ah laguma qori karo rasiidhada lacag qabashada, diiwaanadda Xisaabaadka iyo Xisaab xidhka.
b) Saraakiisha Xisaabaadka ka masuulka ah waa in ay ka ilaaliyaan Xafiisyadda Xisaabaadka inay soo galaan ama yaalaan khadka doogada ah iyo qalimadda khadka doogada ah leh.

## QOD.9AAD.
## AWOODAHA HANTIDHAWRAHA GUUD UU WARBIXINUGU GUDBINKARO MADAXWEYNAHA & G/WAKILADA.

a) Hantidhawraha Guud wuxuu awood u leeyahay inuu wakhti kasta u gudbin karo Madexweynaha JSL, warbixin la xidhiidha hawlaha uu u xilsaaran yahay.
b) Hantidhawraha waxa ku waajib ah inuu warbixin siiyo Golaha Wakiiladda JSL. (Guddiga dhaqaalaha) mar kasta oo ay xogwaraysi ugu yeedhaan.

## QOD.10AAD.
## REEBANAANTA FARA-GELINTA HAWLAHA HANTIDHAWRKA GUUD.

Hantidhawraha Guud iyo Shaqaalaha Hantidhawrka markay gudanayaan waajibaadka hawleed ee hsarciyadu farayaan lama garagelin karo loomana ogaan karo faragelin aan sharciga waafaqsaanyn.

## QOD.11AAD
## DIIWAAN GELIINTA DOKUMIINTIYADA KHARASH & HESHIISYADDA.

a) Hantidhawrka Guud wuxuu sameynayaa Baadhista hore (**Prior control**) ee kharashka, isagoo inta aanu kharashku bixin sugaya waafaqsanaantiisa sharciyeed iyo xeerarka xisaabaadka Dalka JSL.
b) Hantidhawraha Guud wuxuu diiwaan gelinayaa dukumiintiga qandaraasyada Dawladda (**Tender document**) iyo heshiisyada maalgalineed ee Dawladdu qayb ka tahay.

## QOD.12.
## DIIWAANGELINTA DOKUMINTIGA LACAG QABASHADA.

Hantidhawrka Guud wuxuu diiwaan galinayaa dhammaan documintiga lacag qabashada ee dawlada dhexe, dawladaha hoose iyo dhammaan documintiga dakhli dawladeed lagu qabanayo.

## QOD.13AAD.
## BAADHISTA GOOBAHA EE KHARASHYADA.

Hantidhawraha Guud wuxuu samaynayaa badhista goobta kharashka, isagoo sugaya xaqiijinayana:-

a) In kharashku ku baxay hawshii loogu talo galay loona bixiyey si waafaqsan sharciyada iyo xeerarka xisaabaadka loo dejiyey.
b) In lacaguhu ku baxeen si waafaqsan qorshaha loo dejiyey hour marinta dhaqaalaha dalka.

## QOD.14AAD.
## BAADHISTA DAKHLIGGA.

Hantidhawrka Guud wuxuu baadhayaa dakhliga soo gala hay'addaha sharcigu ogol yahay in ay baadhaan, baadhistaas oo lagu hubinayo in dakhliga loo qabtay loona xareeyey siday farayaan sharciyadda, xeerarka iyo awaamiirta loo dejiyey dakhliga.

## QODO.15AAD.
## BAADHISTA HANTIDDA.

Hantidhawrka Guud wuxuu baadhaya hantida ma guurtada ah iyo hantida guurtada ah iyo Xisaabaadka Hantida ah ee hay'adaha sharcigu ogol yahay in ay baadhaan.

## QOD.16AAD
## BAADHISTA XISABXIDHKA & WARBIXINSANADEEDKA.

a) Hantidhawrka Guud wuxuu baadhayaa xisaab-xidhka sanadka oo uu soo gudbiyo Wasiirka Maaliyada siduu farayo qodobka **26aad** ee sharciga xisaabaadka dalka, iyo xisaab xidhka sannadka ee hay'adaha kale ee hantidhawrku awooda u leeyahay baadhistooda.
b) Wasiirka Maaliyadda ee Dawladdu haddii uu warbixinta sanadka ee Hantidhawrka Guud uu ugu gudbin waayo isagoo raacaya habka iyo wakhtiga lagu cadeeyey qodobka **26aad** ee sharciga habka maamulka xisaabaadka dawladda, Hay'adaha kale ee Hantidhawrku awooda u leeyahay baadhista xisaabaadkooda haday ku gudbiyaan warbixintaa Hantidhawraha Guud habka iyo wakhtiga ku tilmaaman sharciyada loo dejiyey Xisaabaadkooda, Hantidhawraha Guud wuxuu warbixintiisa u gudbinayaa Madaxweynaha JSL.

c) Hantidhawrka Guud markuu baadho xisaab xidhka sanadka ayaa Hantidhawraha guud wuxuu diyaarinayaa warbixin sanadeedkii hantidhawrka. Waxaana warbixintaas oo ay la socodaan nuquladdi cadaynta Hantidhawraha Guud ee suganaanta xisaabaadka uu u gudbinayaa Golaha Wasiiradda iyaddoo loo gudbin doono Golaha Wakiilada ugu dameyn 30ka june sanad kasta.

**QOD.17AAD.**
**BAADHISTA XISAABAADKA.**

a) Hantidhawraha Guud wuxuu baadhayaa Xisaabaadka uu soo Gudbiyey Xisaabiyaha Guud ee Dawladda, iyadoo xisaabiyaha Guud soo raacinaayo xisaabaadka warbixintiisa iyo aararta Guud.
b) Hantidhawraha Guud haddii uu ku arko wax qaladaad ah iyo gefef ku jira xisaabaadka uu soo gudbiyey xisabiyaha Guud, waxaa wax laga waydinayaa xisaabiyaha Guud, haddii uu hantidhawraha Guud ku qanci waayo jawaabaha uu bixiyey Xisaabiyaha Guud wuxuu u gudbinayaa dacwad uu ka sameeyey Xisaabaadkaasi Maxkamadda Sare JSL, si Maxkamaddu go'aan uga gaadho cidda ka masuulka ah khaladaadka ka soo ifbaxay baadhistaa, Haddii Xisaabaadku hagaagsan yihiin Hantidhawraha Guud wuu ansixinayaa.

**QOD.18AAD.**
**KA WARBIXNTA MAAMUL XUMADA IYO GEFAFKA XISAABAADKA.**

a) Hantidhawraha Guud baadhista Xisaabeed ee uu ku sameeyo Xisaabaadka Hay'adaha sharcigu u oggolaaday ina y baadhaan haddii ay ka soo if baxaan gefef maamul xumo ee ku lugleh dakhliga iyo kharashka, maamul xisaabaadka bakhaarada iyo maamul xisaabaadka Hantida waxa Hantidhawraha Guud u gudbinayaa warbixin Hay'adaha ay khusayso si wax looga qabto gefefka baadhista ka soo ifbaxa.
b) Haddii warbixinta Hantidhawrka guud talo bixinteedda la fulinwaayo, Hantidhawraha Guud waxa uu si toos ah warbixin ugu gubinayaa Madaxweynaha JSL, sida uu farayo qod.9aad. ee sharcigan.

**QOD.19AAD.**
**TALLO-BIXIN.**

Hantidhawraha Guud wuxuu awood u leeyahay inuu talo bixin u gudbiyo Hay'adaha baadhistooda sharcigu ogol yahay, tallo bixinna waa la soo waydiisan karaa Hantidhawraha Guud.

## QOD.20AAD
## EEDEYNTA & GUDBINTA EEDA.

a) Baadhista Hantidhawrku sameeyey haddii ay ka soo ifbaxaan dambi ciqaabeed, waxaa hantidhawrku ka diyaarinayaa Gal-dacwadeed waxaanu u gudbinayaa Xeerilaalinta galdacwadeedkaas.
b) Xeerilaalintu markay hesho gal dacwadeedka Hantidhawrka Haddii uu ku qanco dacwaddaas wuxuu fulinayaa ooggidda eedda, si waafaqsan qodobadda **70**$^{aad}$ iyo 71$^{aad}$ ee X.H.C.

## QOD.21AAD.
## FULINTA DACWADAHA HANTIDHAWRKU SOO OOGGO.

a) Dacwadaha Hantidhawrku soo ooggo ee ku sheegan qodobka **70**$^{aad}$ iyo qodobka **71**$^{aad}$ X.H.C. lama joojin karo.
b) Dacwadaha Hantidhawrku soo gudbiyo marku Xeerilaaliyaha Dacwaddu khusaysaa ka helo galdacwadeedka Hantidhawraha Guud, haddii uu u arko inuu dambi ku cad yahay cidda lagu eedeyey wuxuu xeerilaaliyuhu eedeysanaha horgeynayaa Maxkamadda awooda u leh dambigaas.
c) Haddii xeer ilaaliyuhu u arko inay eedda wax ka dhiman yihiin wax uu qoraal u gubinayaa Hantidhawrka, isagoo sheegaya waxyaalaha ka dhiman eedda, si Hantidhawrku u soo dhamays tirona waxa Xeerilaaliyuhu Eedeysanaha horgeynayaa Maxkamadda qaadida dacwadaas awood u leh.

## QOD.22AAD.
## AWOODDA HANTIDHAWRKA GUUD.

Hantidhawraha Guud, kuxigeenada Hantidhawraha Guud, iyo Shaqaalaha Hantidharku markay fulinayaan waajibaadka hawleed ee sharcigu faraayo waxay si toosa oo cad u leeyihiin awoodaha hoos ku qoran:-

a) Inay baadhaan goob kasta oo uu ka jiro maamul Dawladeed oo ku lug leh maamul lacageed/Hantiyeed, baadhaanna Diiwaanada, Buugaagta, Dokumintiska Xisaabeed, lacagta caddaanka ah, tigidho, khasnadaha, makhaasinadda, iyo lacagta la kharash gareeyey ee raad ku yeelata fal dambiyeedku soo galo meel dadweyne waxay adeegsan doonaan Boliiska Qaranka.
b) In haddii ay baadhis Xisaabeed kula kulmaan faldambiyeed cad waxay awood u leeyihiin in ay xidhaan Eedeysanaha sharcigana ku horgeeyaan muddo 48 saac gudahood ah sida ku xusan qodobka 24aad ee X.H.C.
c) Waxay u yeedhan karaan in ay yimaadaan Xafiiska Hantidhawrka Guud ama yimaadaan goob Hawli uga socoto qof kasta si ay uga waraystaan xogogaalnimo ku saabsan meelaha sharcigu u ogol yahay inay baadhaan. Ciddii leh dhawrsanaanta sharci waxa ay ula xidiidhayaan sida uu yahay sharciga dhawrsanaantu.

d) Way baadhi karaan, baadhis awgeedna way u qaadan karaan dokumintis xisaabeed ama dokomintis maamul oo ah maraga muujin dambi cid kasta oo leh.
e) Cid kasta waxa ku waajib ah in ay Hantidhawrka gacan ku siiyaan gudashada waajibkooda.
f) Boliisku waa in ay gacan siiyaan Hantidhawrka haddii ay u baahdaan markay gudanayaan waajibaadkooda xileed.
g) Hantidhawrku wuxuu awood u leeyahay inuu ku xidho warqad cad (seal) xafiis kasta oo dawladdu leedahay, meel kasta oo hanti dawladeed taal, ama meel kasta oo Dawladeed oo uu tuhun ka galo markay baadhista ku jiraan.
h) Ciddii jarta warqadda (Seal) wuxuu mutaysanayaa ciqaab isagoo Maxakamadda loo gudbin doono.

## QOD.23AAD.
## DHAWRSANAANTA MADAXDA H/DHAWRKA GUUD.

a) Hantidhawraha Guud iyo ku-xigeennada Hantidhawraha Guud lama xidhi karo haddaan ogolaansho laga helin Madaxweynaha JSL.
b) Madaxda faqradda (B) ku xusan ee qodobkan, waa la qaban karaa haddii la helo iyagoo dambi faraha kula jira.

## QOD.24AAD.
## LAALID.

Sharci kasta, ama xeer kasta oo ka soo horjeeda sharcigan, ama aan la socon Karin waa la laalay.

## QOD.25AAD.
## DHAQAN-GALKA.

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxeexo Madaxweynaha JSL.

**ALLAA MAHAD LEH**

**(Axmed Maxamed Aadan)**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiilada.**

**( Maxamed Xuseen Cismaan)**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada.**